Somali Senate

# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## Golaha Aqalka Sare

## Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

**UJEEDDO: BAAHIN SHAQO:**

**AGAASIMAHA WAAXDA XIRIIRKA DAWLAD GOBOLEEDYADA.**

**TIXRAAC SHAQO LAMBAR: 005**

**CODSIGA SHAQADA WAXA UU FURAN YAHAY:**

**18 April – 24 April 2017**

**EMAIL:** senatesom@gmail.com

**Waajibaadka Agaasimaha Waaxda:**

- Hoggaaminta waaxda Xiriirka Dawlad Goboleedyada
- Diyaarinta iyo isku dubba-ridka xilka iyo masuuliyadda waaxda.
- Maaraynta shaqaalaha waaxda Xiriirka Dawlad goboleedyada
- U warbixinta xog-hayaha guud iyo ku xigeenkiise.
- U qeybinta waajibaadka shaqo xubnaha waaxda si isu dheelli tiran.
- Diyaarinta siyaasadda guud ee waaxda ku hawlgalayso iyo raacista xeerarka shaqaalaha ee golaha iyo tan qaranka guud.
- Hubsashada iyo daba-galka qabsoomidda iyo hir-galinta hawlaha waaxda.

- Diyaarinta warbixin xilliyeed, sanadeed, ku saabsan gudashada shaqo, guulaha, horumarinta iyo caqabadaha.
- Isku xirka guud ee dawlad goboleedayada iyo golaha Aqalka Sare,
- La socodka, diyaarinta u kuur galidda, safarada iyo shirarka lagu qabanayo dawlad goboleedyada.
- Waxii shaqo ah ee kale ee ay u xilsaaraan madaxda Golaha.

**Shuruudaha looga baahan yahay**

- Inuu Soomaali yahay, dhimirkiisu dhan yahay, aan dambi maxkamad xukuntey galin isla markaana da'diisa ka yareyn 25 sano
- Ugu yeraan shahaada 2aad ee jaamacada (master degree) oo la xiriirta maamulka iyo maareynta, maaliyadda, xisaabaadka ama wax u dhigma, sida; *Political science, Law, Public administration, MBA iyo International relations.*
- Inuu lee yahay ugu yeraan 3 sano oo khibrad shaqo ah oo la xiriirta howlaha maamulka, maaliyadda iyo xisaabaadka.
- Inuu leeyahay 5 sano oo khibro ah haddii heerkiisa/heerkeeda jaamacadeed yahay darjada 1aad Bach. Degree, takhasusaadka kor ku xusan.
- Inuu aqaano fiican luu leeyahay, taariikhda iyo juquraafiga Somaliya.
- Inuu si aqaanu ku dheehan tahay ula socoda arrimaha iyo xaaladda guud ee siyaasadda Somalia.
- Inuu ku hadli karo islamarkaana qori karo luuqadaha Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiiriska
- Inuu lee yahay aqoon uu si fiican ugu adeegsan karo aaladda Komputerka.

**Sida Loo soo codsanayo**

Dadka daneynaya waxay ku soo codsan karaan qaab online ah oo keliya. Waxaa lala soo xiriirayaa oo keliya dadka ku soo baxa liiska gaaban. Fadlan ku soo dir codsigaaga, Taariikh nololeedkaaga iyo nuqul shahaadooyinkaaga ka mid ah emailkan: senatesom@gmail.com Fadlan cinwaanka codsigaaga ka dhig jagada aad soo codsanayso iyo numberka tixraaceeda. Gabdhaha leh takhasuska iyo khibrada loo baahan yahay waxaa lagu boorinayaa inay soo codsadaan ugu danbeyn codsigaaga soo dir 24April 2017 4:00pm.